Ka joojiya iibka Aviationka waa astaan qarane!.1

Inta aanan u guda galin xaraashka ku socda astaantaan qaran bal aan wax yar ka iftiinsho marka hore taariikhdiisa oo kooban si aad u ogaataan halista ku soo fool leh adeegan bulsho ee astaanta qaran huwan. Marka hore Ogsoonaan maxay tahay Hey ada duulista gaadiidka cirka ee rayidka iyo Saadaasha hawaada?. Maxay qabataa? Maxay uga duwan tahay Somali airlines?

Magaca Aviation waa astaan qaran ,waa safiirka ku matala Soomaliya xuquuqdeeda hawo ee caalamka

Hadaan soo koobo wadamada aan xuduud wadaaga nahay waa jasiirada Seychelles, Wadanka Hindiya Bombay , Masqat, Cumaan Sancaa Yeman ,Addis Itoobiya iyo Nairobi air space,- xuduudaasoo oo lix jeer ka balaaran tan dhulka. Hay adaan waa daljir dahsoon, kaasoo magaca adduunka looga yaqaan uu yahay (Muqdisho airspace) balse macne ahaan xanbaarsan Somali air space. Waa hey'adda wadareeysa qaynuunka iyo nidaam hoosaadka hey'addo badan oo wadani ah iyo kuwo caalami ah oo la halmaala adeegyada duulimaadka rayidka ah. Waa hey'ad sharci ahaan wadanka masuul uga ah dajinta qawaaniinta,maamulka,maareenta,iyo habsami usocdka hanaanka gaadiidka cirka

Marna suuragal maaha in uu shaqsi ama shirikad diyaaradeed ka hawlgasho garoomada duulimaadka rayidka ah la'aanta shahaado ruqsadeed. Shahaadadaas(leysinada) ma qaataan oo kaliya kuwa haga diyaaradaha(air traffic) ,farsamayaqaanada diyaaradaha(flight engineers) kuwa baara hawl galnimada diyaarada(air worthineess), diyaaradaha wadaniga ah sida Somali airlines, iyo kuwa caalamiga ah,ee sidoo kale shahaadadaa waxaa la siiyaa dhamaan shaqaalaha diyaaradaha ku howlan oo dhan. Sida:-

- Duuliyayaasha (Pilots)
- Inijineerada duulimaadkyada Flight engineers
- Flight despatchers
- Air hosteses
- Radio operators
- Navigators

Waa hey'ada diiwaan geliso dhamaan diyaaradaha uu leeyahay qaranka Somaaliyeed kaasoo xaraf diiwaankoodu ka bilwdo (6o--)

Waa tan leh dhamaan maamulka iyo maaraynata garoomada dalka oo dhan. . Waxay ku shaqaysaa qawaaniin caalami ah (icao) iyo mid wadani ah oo lays waafajiyay. Laamaheeda shaqo waaxaa ugu muhiimsan

- Waaxda hagista diyaaradaha rayidka ah iyo isgaarsiinta.(air traffic services)
- Waaxda saadaasha hawada .
- Waaxda diiwaan galinta diyaaradaha iyo bixinta fasaxa iyo ruqsada shahaadooyinka shaqo ee adeeg.
- Waaxda badbadada & baadigoobka iyo ka hawgalka shilalka gaadiidka cirka.
- Waaxda adeegyada garoomada (aerodrome ground service). dajinta ,rarista iyo diyaarada iyo rakaabka.
- Waaxda naaquudinta (air naviagation).
- Walow aviationku xanbaarsanyahay masuuliyadaas Qaran, hadana waxaa nasiib dara ah in maanta bulshadeena Soomaaliyeed ayanba aqoon ahmiyada adeegyada aviationka uu qabto ,

waxay ku qaldaan Somali- airlines oo shaqadeedu ku koobantahay; maamulka iyo maaraynta diyaaradaheeda faro ku tiriska ahaa.

Waa maxay sababta adeegaan qiimahaa leh uu dadwaynaha soomaaliyeed ayan u aqoon? 2

Jawaabtu waa mid kooban waana Taariikhda ay soo martay kalaboobkii dhaqaalaha adeegaa. Aviationku waa mid ka mida halboolayaasha ilaha dhaqaale iyo adeeg bulsho ee ay Soomaaliya leedahay. adeegani waxuu dhaqaalihiisa ka soo xaroodaa adeegyada kala duwan ee uu qabto, sida hagida diyaaradaha,(air navigation) soo dajinta iyo kicinta, sidoo kale kan uga soo xarooda adeegyada garoomada sida rarista, dajinta xamuulka , rakaabka iyo sahaysiinta.

Halkii laga abuuri lahaa garoomo bixiya adeegyada kala duwan leh

- sida; MAS (Mogdishu Aerodrome Service);
- HAS(Hargaysa Aerodrome Service);
- BAS (Bosaso Aerodrome Service)
- KAS (Kismaay Aerodrome Service) ayaa aviation Soomaaliya waxuu waligiiba ahaa mid laga maroorsado dhaqaalihiisa adeegyadaa laga abuuri lahaa laga soo bilaabo markii laga xoroobay gumeeystihii ama bilawgii dawlad soomaaliyeea - waa taa sababtay garoomada Soomaliyeed adeegoodu u noqdo mid ka hooseeya garoomada kale ee wadamada aanu dariska nahay .

Bartamihii 70 tameeyadii ayeey aheed markii mid kamida ilihii dakhli ee aviationka Somaliyeed uu lahaa- (Aerodrome ground service) lagu wareejiyay shrikadii somaliairlines, (waa kan manta markale mudo 10 sano ah loo saxiixay SKA_AIR).

Taasi waxay ahayd bilawgii taariikh-madoobaadkii aviationka iyo baabi'intii adeegyada garoomada Soomaaliya, sidoo kale dhaqaalihii kasoo xaroon jiray adeega naaquudinta (air navigation) waxa lagu yiri waa canshuur waxayna ku xaroonjirtay khasnada dhexe ee soomaaliya.

Bal aan tilmaamo dhaqaale moroorsigii haray waxa uu aviationka Somalia ka dhaxlay si aan u ogaano kan **SKA-Air** dhaxalsiin doonto; In dhamaan adeegii aviationka ay cuuryaamaan , xagga garoomoda, shaqaalaha iyo qalabkaba, taasoo xitaa burburkii ka hor iska daa horumarin garoomo gobale, xitaa muqdisho airport uu ahaa mid hawlgaba.waayo dhamaan-qalabkii garoomada ee adeegaan waxaa dhaxlay shirikadii diyaaradaha (Somali airlines),gooni u yeeladkaas (monopoly) adeegga garoomada, wuxuu sababay inayan abuurmin shirkado diyaaradeed,iyo in shirkadihii kale ee caalamka ay ku

adkaato isticmaalka garoomada Soomaaliya taasoo keentay aakhirkii inay u weecdaan dalalka deriska ah.

Sidaa si le eg dhaqaalo daro awgeed waxaa hawlgab noqday dhamaan qalabkii hawamaaxidda , kii saadaasha hawada iyo isgaarsiintii kale ee adeegaan mid gobal iyo magaalaba,taa soo aakhirtaankii keentay in adeegani xumaado markaasna ay yaraato kalsoonidii shirkadaha diyaaradaha dulmara hawada dalka soomaaliyeed ku qabeen. Taasna waa tan keentay In 600 nautical melis Seychelles xuduukeenii hawada masuuliyadeeda loo wareejiyo kadib markii la awoodi waayay qalabkii baahidaa adeeg lagu dabooli lahaa. Waa taa sababta manta ayan hagayaasheenu ayagoo fasax ka helo Seychelles mooyee ayan diyaadad joogsare rabto jahada koonfur bari si toosa ugu fasixi Karin marka ay ka duulayso muqsisho.

In kastoo arrinka kor ku xusan ahayd dhacdo naxdin leh hadana Ku baraarugaa dhaxal wareega 600 nm ee Seychelles loo gooyay waxay sabab u ahayd Curashadii hay'ada duulista rayidka iyo saadaasha hawada (Somali civil aviation authority).

Curashadii hay'ada duulista rayidka iyo saadaasha hawada (Somali civil aviation authority). 3

Hay adaan waloow ay soo raagtay curashadeeda hadana Waxaa xusid mudan wasiirkii wasaarada gaadiidka dhulka iyo circa xiligaas, ee ahaa Dr. Mohamed sheekh osman (jawaari) oo ahaa aabihii curashadii hay'adaan dadaal dheerna u galay sidii hirgalinteeda iyo sidii ay u madax banana lahayd sannadkii (1990) Waxuu taaba galiyay in hey'adaan si sharci ah loogu soo celiyo dhamaan sharaftii iyo karaamadeedii horay looga maroorsaday soona celiyey dhamaan wixii , qalab iyo dhaqaale ay lahayd. Dadaalka Dr.Jawaari ma ahayn oo kaliya qorista dastuurka ha'yadda laakiin wuxuu dadaal badan ku bixiyay sidii uu uga ansixin lahaa dastuurka hay ada golahii shacabka ee dawlada Soomaalkyeed markaa xukunka haysay. Nasiibdaro iyadoo Hay'addu saddex bilood keliya shaqyanayso ayaa dawladdii dhexe xukunka laga tuuray wadankiina burbur iyo dagaalo sokeeyo ay ka bilawdeen.

Waxaa sidoo kale xusid mudan shaqaalihii adeegaan oo dhamaantood isku kaashaday in uusan dayacmin halgankii Dr. Jawaari muujiyayna dhabaradeeg ilaa ay ka hirgaliyeen hay ada la yiraa marka la soo gaabiyo CACAS (civil aviation caretaker authority for Somalia) waxyna aviation ka Somalia ka badbaadiyeen dhibaatooyin badan –ha ugu waynaato tii qowleysata ahayd oo la dhihi jiray Avior aviation ay damacsanayd, in ay ku maroorsato si sharci daro ah adeega aviation-ka waa shirikad sida SKA-Air oo kale ahayd oo unisom II lasocotay taasoo dhankasta oo laga eego SKA-AIR kala mida ah, hadaynaba ahayn tiiyoo magacii soo badalatay. .

4- Sidee buu adeegaan bulsho ku badbaaday mudadii dawlad la aanta?.

Curashadii CACAS ? Civil Caretaker Authority for Somalia.4

CACAS Waa adeega kaliya ee ka haray dhamaan waxii adeeg bulsho ee wadankaan lahaa.

Shacabka Somaliyeed waxay abaal u hayaan ilaahay kasokow , dhamaan shaqaalaha hey'ada duulimaadka rayidka somaaliyeed meel kasto oo ay joogaan dulqaadka iyo dadaalka ay ku bixiyeen badbadinta adeegaan.

Sidoo kale waxay shacabka somaliyeed abaal lama ioobaana u hayaan dawladda

iyo dadka reer **Austaralia iyo malesia.**

gaar ahaan dafcadoodii ciidanka cirka ee hagayay diyaardaha kuwasoo suura galiyay isku keenidii shaqaalihii hore ee u carbisnaa adeegan loo soo tababaray ee aqoonteeda lahaa intii uusocday hawlgalkii UNISOM II.

Badbaadinta iyo kobcinta adeega aviationka Sosomaliyeed waxaa saldhig u ahaa dadaal Wadajira ah oo ay iska kaashadeen hey'adaha: (ciidanka cirka Australia oo ku matalysay UN ,UNDP , ICAO) iyo shaqaalihii Soomaaliyeed hey ada duulista iyo saadaasha hawada, kuwaas ku guulaystay in Qaraar UN-ka ah lagu ansixiyo hey adaan gacan ku haynteeda in loo wakiisho CACAS , taasoo looga golahaa in lagu badbaadiyo hagista diyaaradaha oo qarka u saarnayd in wadamada dariska loo kala qaybiyo. Shaqaalahaan oo aan loo ogayn dadaalka ay muujiyeen la'aantoodna uu adeeegan hoostagi lahaa.

Aviationka iasagoo gacan ka helaaya ururada aan kor kusoo xusnay ayuu ka hawl bilaabay Soomaaliya April 1993 waxayna u xuubsiibatay CACAS(Civil Aviation Caretaker Authority for Somalia),December 1993.

Aas aasi hii CACAS(Jeo W Brunswing)

CACAS waxay laguurtay UNISOM II, saldhigeedii koowaadna waxuu noqday Nairobi- Kenya si loo sugo habsami u socodsiinta adeega dulmarka hawada sare ee Soomaaliya inta ay ka imaaneyso dawlad Somaaliyeed oo masuuliyadan caalamiga hanan karta.

Sidoo kale CACAS waxay laamo shaqo ka abuurtay wadanka meelaha yare xasiloon. Aviationka Somalia waxuu ku hawl bilaabay 12 ruux oo Soomaali ah maantana waxaa ka shaqeeya ilaa 150 soomali iyo ajanabi ah.

Qaar kamida madaalayaasha adeegaan ee jooga xarunta CACAS ee kenya

Adeegaayada ay qabato CACAS Waa maxay?5

Masuuliyada iyo baaxada adeegaan qaran waa mid aad u balaaran sida aad taariikhdiisa ka daalacateen ,balse inta aanan u guda galin CACAS waxa ay qabato,bal aan yare timaamo uruka ICAO(international civil aviation organization) iyo doorkeeda shaqo ee adeegaan.

SOMCAA (Somali civil aviation authority) waxay xubin kayahay urukan caalimi ee ICAO (international civil aviation organization). Urukani marka dawladi jirto shaqadiisu waa la

- Kaabid dhaqaale iyotalo siinta dawladaa arimaha aviationka.
- Siin khubaro bixisa tababaro kaladuwan gudaha wadanka iyo dibadiisaba dhamaan shaqaalaha adegaan.
- Quburo ka caawisa habsami u socodsiinta adeegan hadba meesha looga baahdo.
- Sidoo kale SOMCAA waxay xubin katahay - African Civil Aviation Commission (AFCAC) iyo Arab Civil Aviation Commission. (ACAC), kuwaasoo sidoo kale uu ka heli jiray kaalmooyin badan.

Dawlad la'aanta awgeed wallow fursadahaasi intoodii badnayd lumen hadana ICAO badalkii talasiinta dawlada ayaa waxaa lama huraan ku notay in buuxiso qaykamida masuuliyadii dawlada taasoo ah hooyadii adeegaan mustaqbalka laga abuuri lahaa -waa hawada dalka soomaaliyeed taasoo xambaarsan xitaa tansare ee dalka djabuti.

SOMCAA
SOMALI CIVIL AVIATION AUTHORITY

Jawaabta oo kooban waxa ay qabato CACAS waa ;

Aan u kala qaado saldhigeeda way ee Kenya iyo xarumaheeda dalka.

CACAS- Kenya waxay Ilaalisaa xubin Nimadi iyo xiriirka caalami (ICAO) iyo Kan gobaleed (AFCAC) ee hay'ada duulimaadka rayidka iyo saadaasha hawada ay xubinta ka ahayd.

- Bixin adeega sare ee hawamarid taasoo suura galisay in hawadeena ay ka badbaaday burburkii muda labaatanka sano jiray Kana hortagtay in hawada daka soomaaliyeed loo qaybiyo wadamada dariska ah.

- Ku matalida Masuuliyada dawlada somaaliyeed adeegaan xiriirada uu la lahaa dalal African ah ama ku caalami ilaa laga dawlad kala wareegta mustaqbalka.

Shir cadhacaayo xarun gobaleedka bariga iyo bartamaha Africa (nirobi).

- Tababatida shaqaalaha aviationka dhamaan qaybaha kaladuwan ee adeegaan la halmaala min xarun ilaa maamulgobaleedyo.

- Tababarida howl wadeenada garooma dalka.



(Aqoonkordhin shaqaalihi hore & arday cusub).

Xarumaheeda dalka

CACAS SOMALI. Caawinaada garoomada wadanka sida (tababaridda

shaqaalaha waaxyaheeda kala duwan ee adeegaan). hagayaal,farsamayaqaano, sadal hawo,dab-damiyayal.

(garoonka bossao)

- Suuragalinta gaarista hey'ada gargaarka gobalada dalka.
- Bixinta adeega aasaasiga ee garoomada wadanka xag shaqaale ama qalab.
- Diiwaan galinta dhaqdhaqaaqyada gadiidka hawadeena mara laga soobilaabo maalintii ay shaqadan bilaabeen.

Hadaan waxqabadka CACAS intaa kusoo koobo waxaa iyana lama iloobaana shirikadihii abuurmay mudadii burburkii lagu jiray.

Hadaan nahay shaqaalihii aviationka soomaaliyeed ha joogan dalka gudahiisa ama dibadiisa waxaan abaal u haynaa dhamaan shirikadaha diyaaradaha ee waqtigan adag noftooda ,maalkooda iyo diyaaradahooda u huray sidii ay ugu adeegi lahaayeen bulshada somaliyeed meelkasta ay joogaan kuwaa soo ay kamid yihiin Dallo Airlin iyo Afircan airlin.

Tacadiyada uu adeegaan kala kulmo kumeelgaarada dawladeed ee dalkan uu soo maray.6

Intaanan ka hadlin tacadiyadaa aan iraahdo marka hore: Maxaa lga doonaayay doonaayay ama uu adeegaan kasugaayay markay dawladi dhalato?

Waa qof iyo rayigii,

waxaan kusoo koobi lahaa in adeegaani yahay adeeg farsamo oo facyo badan,baaxadiisa shaqona ku kala baahsantay adeegyo bulsho oo kale oo wadani ,sida costomes, emigaration, ciidan cir ,bolis iyo adeegyo bulsho ee caalami ku kulmaan.

Hadaan dhanka kafiirino aviationkii shalay iyo kan bari waa kaaf iyo kale dheeri,waayo somlia manta tiro kabadan ayaa qurbajooga,taasi waxay badaleesaa qaabdhismeedkii aviationka waxaan fileenaa goroomo caalami ah aad ubaaxad waawayn oo wadanka oo dhan ku baahsan in uu maamul dawladeed walba yeesho. diyaaradahana tiradoodu qiyaas malahaan doonaan ha ahaadaan gudaha wadanka ama kuwa caalami .waxay kaloo badali doontaa muuqaalka magaca adeeg laftiisa waayo waxaa baahay garoomadii wadanka marka waxaaa qasaba in lahelo(aviaton board) waa dalad isku xirta waxaasoo shaqa ah ee wadanku yeelan doono iyo waliba diyaarintii dastuurkii lagu dhaqi lahaa adegaan, waayo Somalia qaynuun ahaan aduunka waxaaa uga diiwaan gashan hal aviatin code (air space-iyo kan sadaalhawo meterological code) sidaa dartee waxaa lagama maarmaan ah in la helo farsamadii dib loogu qaabayn lahaa adeegaan baahay intii burburka lagu jiray . Mida sedaxaad, shaqaalaha ay gacanta ku hayso ICAO hadii lafiiriyo baaxada shaqo ee mustaqbal tiro ahaan waa 5%, inta hartay dawladii timaado ayaa laga rabaa in ay haatan u sii meel dayato cidii u tababari lahayd- min gobal ilaa caasumad.

Ayadoo la'eegaayo Muhiimadda ,Mugga iyo Masuuliyada adeegaan soo wajahayso mustaqbalka, dawladu waa in ay dayataa ruuxii ama qofkii ku haboonaa ee aqoontiisa ugumiro-dhalilin lahaa ,dabcan waa buux qaar aqoontan ilaahay siiyay shardina maahan xitaa in uu somali kasoo shaqeeyay- kaaso u diyaariyo;

- Shaqaalihii mustaqbalka la wareegi lahaa adeegaan.
- mashruucii lagu taaba galin lahaa kaadirkii bari shaqadaan loo idman lahaa.
- xiriirka wasaarada gaadiidka, CACAS iyo wadamada u- heelan kaalmaynta soomaliya xaga Qalabka ama tababarada.
- Una kuurgalaayo, qiimeyna ku sameeyo qalabka iyo shaqaalaha bari ay ka fili karaan CACAS si loogu diyaargaroobo mustaqbalka masuuliyada aduunku deegaankan ka filaayo.
- is waafajinta qaanuunka caalami iyo kan wadan ee hay ada duulimaadka rayidka ah si waafaqsan sharciga dalkeena yeelan doono mustaqbalka. (Dastuurka aviation Somalia yeelandoono).
- Qof lasocda.Hadba marxalada siyaaso wadanka maraayo, markay ku haboonaatana abuura xaalad kala wareega oo macquula.
    - Una kala dabqaada dhamaan hayadaha la halmaala adeegaan talooyinkoodana xiriiriya.

Waxaa layiri "halkii cir laga filaayay ayaa ceeryaamo ka timid".

Waa hagardaamooyinka joogtada ah ee adeegan qaran uu kala kulmo dawladihii kumeelgaarka ee taliska soomaaliya soo maray, intaan taa u guda galin gaboodfalyadaa bal aan waxyar ka sheego waxa dhici lahaa hadii ayan dhici lahayn in ICAO ay adeegaan badbaadiseen sida uu xaalka hawada soomaliyeed ahaan lahaa.

Somalia 1991 markii ay dawladii burburtay daladii dhaxe ee dalka waxaa meesha ka baxay adeegii markiisii haraba gabaabsiga ahaa ee hawadena diyaaradaha dulmara lasiin jiray, hadaba si loo sii isticmaalo dulmarkaa (waayo hawada somaliya waxa ay isku xirka bariga iyo galbeedka aduunka) ayaa waxay ICAO- oo ah hay -ada aduunka masuul uga ah dhowrista sharciga ku duulista hawada ayeey waxay teena dulsaartay ama duldhigay (contingency plan)- qorshe ku meelgaara oo kala xadeeya diyaaradaha mara hawada sare –hagis la'aan.

Qorshuhani waa ku meel gaar ee ma ahaankaro mid sii raaga, waayo diyaaradaha hawadeena dulmara waa badanyihiin isticmaalida qorshahaana waa ku dhib taasoo hadii dawlad lawaayo ama dawlad helis waqtigeedu dheeraado badelkeeda diyaaradahaa hawada dulmara si ay u helaan hawshii ay qaban jireen hagayaasha somaaliyeed(air-trafic controllers) waxay codsan kareen in hagida diyaaradaha hawada dalka somaliya loo kala qaybiyo wadamada somaliya hawada kala dariska ah(waa kuwaan qaybbaha hare ku soo xusay). Haday taasi dhaci laheed (HAWADA LAKALA QAYBIYO) waa suaale maxaa dhici lahaa? Waa mida aan kolay anigu ku gudoonsiin lahaa bilad sharaf intii gacan kagaysatay badbaadada adeegaan Somali iyo Ajinabiba ,waayo in ay gacanta somalia kusoo noqto marka dawlad lehelo kadib waxay soomaaliya ku qaadan kartaa ugu yaraan ilaa 30 sanadood.

Tan hore in dib loola soo noqdo adeeg hawo maaxid oo wadamo lookala qaybiyay waxaa horyaala shuruudo badan oo qalab iyo shaqaale dhameestiran kuxiran,tan labaad kulanka guud ee ICAO waa mid dhaca afartii sananaba mar, sidaa darteed bal aan iswaydiino inta kal fadhi ay ku qaadankarto marka ay dawladi dhalato in dib loo soo celiyo adeegaan hadii uu faraha kabixi lahaa, badalka maanta qayb kamida uu wadanka ka shaqeeyo qaybta kalana ay magangalyo ku tahay wadan dariska ah asagoo waliba magacii aduunku u yaqiin (muqdisho air space) halkaa ku dagan kusoo gurya noqashadiisuna ku xirantahay oo kaliya dawlad mideesay ee wadanku yeesho mustaqbalka markay ahaataba iyo in ay u soo magacwdo adeegaan qofkii u soo dharaandhirin lahaa soo ururinta qalabkiisa yaalo meelo badan oo aduunka dacaladiida ah. **,badalka dawladii timaada ay la imaaneeso;**

Magacaw agaasime guud ku abtirsada aqoon Somali airline oo kaliya ama ciidan cirka!(oo haba yaraatee adeegaan aviation wax khibtad aqoon iyo waaya arnimo midna u lahayn) , hadana ka dhawreesa in ka miro dhaliso adeegaan soo dhaxlay caqabadahaa taariikhiga ah haatana horyaalaan waxaasoo taraanturooyin ah. waa maxay natiijada laga filankaraa? waa mid iska cad. Magacaabis ka dib maxaa dhaca? **Waa ubad layiri aabahaa hogaami!**. Maaha waxaan ka hadlaayo maamul iyo maaray garoon ee waa xilkaa ah halka ay ka guntanto siyaasada guud ee adeegaan. Waayo way jiraan maamule yaal garoon oo shaqooyin hufan ka gaya goroomada dowlad gobaleedyada waana ku amaaneenaa.

Dhamaanagaasimayaashaasi ha ahaadan kuwo maamul dawlad gabol ama dawlad dhexe e bar til-maameed kooda kowaad waa dagaalka ay ku qadaan xaruta CACAS oo ah halka mustaqbalka adeegaan bulsho laga tarmin lahaa marka la helo dawlad . Cajiib!. Oo maxuu dagaalkoodu salka ku hayaa? Hadaan u iraahdo jawaabatooda. Waxay yiraahdaan ;
" CACAS waxay qaadaa canshuurtii hawada sare ee dalaka". Maxaa ka run ah? Xaguuse dhaqaalaha kasoogalaa CACAS ?.
Marka hore aan kala qeexno farqiga u dhaxeeyo Canshuur iyo Khidmad. Canshuuri waa saamiga dawladu saarato hadba waxa fasaxeeda ku xiran in laga hawgalo, halka Khidmadi qiimaheedu ku xiran yahay hadba tayada uu leeyahay adeegaad bixsid. ICAO markay curisay adeegii aviationka waxay

ka mushaarsiin jirtay dhaqaalihii UNSOM II. Si adeegaan u sii socdo UNSOM II kadib waxay ICAO xiriir lasmeesay IATA. (International airtransport assosiaton), taasoo masuulka ah dhamaan diyaaradaha isticmaala hawadeena, si qasabana ku ogolaysiisay IATA–(madaama ay damaanad masuuliyad dawlad ka marantahy adeegan ay bixiso CACAS) in IATA bixiyaan Khidmada ugu yar ee diyaaradaheeda isticmaalka hawadeena,

CACAS waxaa kaaba ICAO oo Somalia markii horaba kaabi jirtay iyo dawlado kale oo samafalayaal ah oo somalia ka kaalmayn jiray kabayaasha adeegaan. Dagaalkaa ujeeda badan ee agasimayaashu ku soo qaadaan CACAS wuu is badalaa kadib marka ay yimaadaan xarun goboleedka aviationka iyo tan CACAS ee fadhigeedu yahy Nairobi, waayo waxay ogaadaan in xaalku sidaa u sahlaneen oo CACAS ay ku fadhido Qaraar UN, markaas ayaa damacooda ujeeda badan ruuxba dhan uga faaiideestaa. Qaarbaa garoomadooda kadhista, adeegooda ka qalabaysta, shaqaalahooda adeeg garoon ka tababarta inta ay danta guud ee soomaaliya ka saldhiganayso sida Somaliland iyo Puntland, qaarna waxay kororsadaan jahawareer iyo caro taasoo aakhirkii keenta in ay dhaxal guuriyaan mustaqbalkii xarumihii adeegaan ugu waaweynaa ee ku yaalay halkay joogaan, sida aadan cade airport oo maanta oo loo mehrinaayo maanta SKA_AIR aviation, halkii ay abuuri lahaayeen AAS (adan ade arodrome service). Waa dhici kartaa qofkaan joogin xiligii UNSOM II in maanta uu ku indhadaraandaro qalabka ay shirkadaan maanta keentay Adan Cade Airport , balse waxaa layiri “xusuus baa geela lagu…….”, xiligii UNISOM II dhaqdhaqaaqa garoonkaan Muqsisho airport waxuu ahaa maalintii 200 ilaa 500 diyaaradood qalab haggis dabdamis kaabayal dajin iyo raris waxii garoonkaa loo isticmaali jirana waxaa bar loogu deeqay Somalia waxayna ku xayiran yihiin baqaaro dalal kala duwan, ee soomaalaay qiilkale ma u haysan xaraashka adeegan qaran?

Bal arg muuqaalka uu lahaa mugidisho tower xiligii unisom2 iyo wax qalab gadaashiisa yaal.

Tankale adeega qaran shirkad hoos tagto kama hoos shaqeeyo balse shirikadi way ka hoos shaqaysaa adeeg qaran ayadoo labaxeesa waxii khidmda ee wakaaladeeda siiso hayada u wakiilka ah dawlada. marka hadii arintu ayan ahayn ku daneesi shaqsi iyo ku macaash hanti qaran ee ay tahay aqoondari aan wax barano sida ay wallaalaheena djabuti adeegooda ula mataneeyeen kan wadanka UAE, ama

Tanzania ula mataaneesay BA (Britain) ama wadanka Kenya ama Uganda gooni loogu nadaamiyay.

Hadaba, wallow ay caado u ahayd adeegaan qaran in uu taariikh ahaan ku soo dhex nolaado kala boobka kaalimaha halboolayaashiisa dhaqaale hadana dawlad wadan koo dhan isku haysa ayuu lahaa oo mar unbuu rajo qabay, balse tani maanta waa mid ka duwan oo dawlad mideysan iyo adeeg midna ma laha halista iyo caqabadaha horyaalana waa badanyihiin,sidaa darteed ayaa adeegaan halkuu ka filaayay in loo soo magacaabo qof;

aqoontiisa farsamo-adeeg yaqaano,

ogsoon halka dantiisa ku kala firir santahay.

yaqaana in shaqaalihiisu qaaarna dayacan yihiin, qaarna ku kala hoos shaqeeyaan dawlad gobaleedyo.
yaqaana luqadaha farsamo ee lagu mideynkaro ururadiisa kala duwan iyo dawladihiisa kala jeed jeedo,ayaa waxaa had iyo jeer dhacdo in la soo magacaabo kuwo magaca agaasime guud huwan, balse waxqabadkoodu ku simayahay darajo maamule garoon ,kuwaasoo xilkaas loo dhiibay ku marin habaabiya mustaqbalka adeegaan qaran halisyo badan dhaxalsiiya sidatan maanta joogta in SKA_AIR loo mehrinayo adeegii airborkii adan cade barlamanka Somalia ka dhawreesa xalaaleentiisa.

Mahamed Abukar nur

Email- maxnour62@hotmail.com

952-465-5654

LINK: http://somalitalk.com/tag/somcaa

Faafin: SomaliTalk.com | March 19, 2011